



Wargeyska Mountain View

Fariinta Agaasimaha

Jimcada soo socoto, Abril 28, waxaan qaban doonaa shirka wargelinta ee loo qaban doono dhamaan waalidiinta caruurta da'dooda gaari doonto shan sanno marka la gaaro Sateembar 1. Macalimiinta xanaanada waxay la qeybsan doonaan waxyaabaha xanaanada iyo dugsiga oo idila ka fishaan ardayda, iyo waxa caruurta iyo waalidiintooda ku celcelin karaan si ay u ahadaan kuwo aad ugu diyaarsan xanaanada. Fadlan u sheeg dhamaan asxaabtaada iyo goyskaada daggan gudaha soohinta Mountain View iyo haysta cunug soo gaaray da' in ay yimaado xanaanada bilowga qaboobahaan. Waxaan rajeyneynaa in aan halkaas kugu aragno.

Mountain View Summer School

Summer School applications have been sent home. The program will run from 8:00 am until 3:00 pm, Monday-Thursday. The program will begin June 12 and end on July 13. Students will participate in Math and Reading activities in the morning, and Enrichment activities and field trips in the afternoons. Breakfast and lunch will be provided to all students in the program. There are a limited number of spots for students, so turn in your applications early!

Tartanka Fanka Mountain View

Gugaan (spring), waxaan qaban doonaa tartanka fanka. Fikradda tartanka fanka waa "Ku Dhaqan Sharciga Dahabiga." Sharciga Dahabiga waa in loola dhaqmo dadka kale sida aad adiga rabtid in laguula dhaqmo. Ardayda waxay ka qeybgeli karaan fanka qeybaha soo socda: dheesha, safafka dheesha, suugaanta, soo saarka muusikada, sawirada, iyo fanka la daawado. Ardayda waxay geli doonaan mid ka mid ah labada qeyb, pre-K ilaa darajada labaad ama darajada saddaxaad ilaa darajada shanaad. Si ay u galaan, ardayda waa in ay fankooda u gudbiyaan macalinka fasalkooda ugu dambayn dhamaadka maalin dugsiyeedka, bisha Maajo 12. Waxaan rabnaa in qof kasta ogaado taa imanka si ay u helaan waqti ku filan oo looga shaqeeyo gelitaankooda. Haddii aad u baahan tahay macluumaad dheeraad ah, ama koobi kale oo ku saabsan sharuudaha, waxaad arki kartaa Mr. Elliott oo laga helo Qolka 102 ama waxaad weydiin kartaa xafiiska weyn.

Dib u Habeynta Sare ee Utah

Todobaadkii la soo dhaafay, waxaan ku celcelinay waxa loo baahan yahay in la sameeyo haddii lala kulmo dhul gariir. Dhamaan ardayda waxaa la baray in ay hoosta ka galaan miisaska wax lagu qoro ama miisaska caadiga; iyo in ay gacmahooda ku daboolaan dusha madaxooda. Dadka waaweyn, marka ay soo booqdaan Mountain View, ha ogaadaan in haddii dhul gariir lala kulmo, waxaa idin lagu dhiiri gelinaa in aad heshaan miis ama albaab aad ku gabataan. Hubso in aad ka fogaatid dariishadaha, si aysan muraayadda kuugu soo jabin. Macalimiintena iyo ardaydena waxay qabteen shaqo heer sare iyaga oo ilaaliyay ammaanka iyo mas'uuliyadda saaran. Mahadsanidiin dhamaan inta kaalmo ka geystay leyliga dhul gariirka.

Upcoming Events

Jimco, Abril 28

Wargelinta Xanaanada, 3:30 Qolka Shirarka

Talaado, Maajo 2

Shirka Waalidiinta iyo Macmacaanka, 8:30, CLC Qolka 182

Jimco, Maajo 12

Taariikhda Ugu Dambeyso ee Laga Qeybgalo Tartanka Fanka Mountain View

Agaasimeyaasha iyo Shirka Macmacaanka

Agaasimeyaasha waxay jecel yahiin in ay kula kulmaan, kula qeybsadaan waxa ku cusub Mountain View, iyo in ay ka jawaabaan su'aalaha laga yaabo in aad qabtid. Wada hadalkena xiga ee loo qaban doono Waalidiinta iyo Agaasimeyaasha waxaa lagu qaban doonaa Community Learning Center (Xarunta Waxbarashada Bulshada) maalinta Talaadada, Maajo 2, marka ay tahay 8:15. Waxaan rajeyneynaa in aan halkaas kugu aragno.